
# Xaquuqda ka Gargaarida Nolosha

Assisted Living Bill of Rights

## Waa maxay Xaquuqda ka Gargaarida Noloshu?

Xaquuqda ka Gargaarida Noloshu waa sharci adiga ku ilaaliya haddii aad ku jirto Goobaha ka Gargaarida Nolosha. Waxa aad ka heli kartaa sharcigan iyo ilaalino kale oo la xiriira sharciga Ka Gargaarida Nolosha Qofka ee MN barta [Sec. 144G.91 MN Statutes](). Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa qaarka mid ah xaquuqaha ugu muhiimsan ee aad leedahay ee sharcigu uu dhigayo.




## Waa maxay sababta ay muhiimka u tahay?

Sharcigani waxa uu kuu ilaalinayaa adiga siyaabo badan. Mid ka mid ah kuwaasi waa ka ilaalinta ka saarida goobaha. Haddii Rugtaada ka Gargaarida Noloshu ay isku daydo inay rugta kaa saarto ayna ku xad-gudbaan mid ka mid ah xaquuqahaaga, kolkaa waxa aad racfaan ka qaadan kartaa arrinta ka saarida goobta.

## Daryeelka iyo Adeegyada

Daryeelkaaga iyo adeegaaggu waa khasab inay yihiin:

- Wax la isku halayn karo. Taa macnaheedu waa inaad isku halayn kartid, inay joogta yihiin ayna fiican yihiin.
- Kuwo ay sameeyaan dad tababaran.
- Kuwo ku salaysan waxa aad u baahan tahay.
- Kuwo leh qorshe adeeg oo la cusboonaysiiyo loona hogaansamayo.

## Ma diidi karaa daryeel ama adeegyo?

Haa. Waa aad diidi kartaa daryeel ama adeegyada gargaarida nolosha. Haddii aad diido mid ka mid ah kuwaa, rugtu waa khasab inay kuu sheegto haddii ay jiraan wax khatar caafimaad jireed ama mid maskaxeed oo ka dhalan karaa diidmadaa.

## Ma inaan caawiyaa anigu qorshaha daryeelkayga iyo adeegyadayda?

Haa. Waxa aad xaq u leedahay inaad qayb ka noqoto wixii qorsheyn ah ee ah daryeelkaaga iyo adeegyadaada. Taa waxaa ku jira isbedelada iyo qiimeynaha daryeelkaaga iyo adeegyadaada.

Qayb ka ahaanta qorsheyntu waxa ay noqon karaan waxyaabaha sidda:

- Kala hadalka daryeel-bixiyeyaashaada daryeelada iyo adeegyada, dabiibka aad u baahan tahay, iyo waxyaabo kale oo la heli karo

- Haysashada ehel ama wakiilo kale oo qayb ka noqda qorsheynta

- Horey ugu soo sheegida wixii isbedel ah ee lagu sameynayo daryeelkaaga ama qorshaha adeega



## Sida fiican ula dhaqmida

Waa khasab inay ma walba laguula dhaqmo si xushmad iyo qadarini ku dheehan tahay. Hantidaadana iyana waa si wacan loo dhowro.

## Si Xun ula Dhaqmida

Si xun laguu lama dhaqmi karo. Waxa aad xaq u leedahay inaan laguu gaysan xad-gudub ah oo dhanka caadifada, galmada, ama jirka ah. Waxaa kaloo ay tahay in lagaa dhowro dayac, si xun ula dhaqan, iyo ku takri-falad dhaqaalahaaga. Taa macnaheedu waa qof doonaya inuu u isticmaalo **lacagtaada** ama hantidaada naftiisa.

## Xaqqa ah inaad si Xor ah aad u Bixi Kartid una Soo Noqon kartid

Markii aad rabto waa inaad bixi karto imaana karto goobtaada. Xoriyaddu waxa ay Xadidnaan kartaa uun haddii sharciga ama qorshahaaga adeegu uu saa dhigayo.

## Ma dooran karaa waxa aan anigu rabo?

Waxa aad xaq u leedahay inaad naftaada u doorto waxyaabaha aad adigu rabto. Waxa aad sameysan kartaa qorshe maalinle ah oo aad adigu rabto waxa aadna dooran kartaa cidda aad rabto inaad la macmiltanto.

## Aniga miyaa maamulanaya lacagtayda?

Haa. Adiga ayaa mas'uul ka ah maamulka lacagtaada go'aansana kara sida aad u isticmaalayso.

## Booqdayaasha iyo Hawlaha

Waa lagu soo booqan karaa markii aad rabtid. Dadka ku soo booqanayaa waxa ay noqon karaan ehelkaaga iyo asxaabtaada iyo ciddii kale ee aad rabto. Xaquuqdan kaliya waxaa la xadidi karaa uun haddii loogu baahdo xadidaadda amaankaaga iyo caafimaadka awgood.


Waxa aad xaq u leedahay inaad ka qayb gasho hawlaha beesha ee ah dhinacyada bulshada, diinta, ganacsiga iyo siyaasadda.

## Xogta Qarsoodiga ah ee Shakhsiyanka ah iyo Aqoonsiga Dhaqanka

Qarsoonaanta xogtaada shakhsiyanka ah iyo aqoonsiga dhaqankaagu waa khasab in la xaq dhowro mar walba. Haddii xaalad degdegi ahi aysan jirin, shaqaalaha goobta aad ku nooshahay waa inay mar walba albaabka garaacaan ka hor inta aysan soo gelin qolkaaga. Waxaad kaloo xaq u leedahay xog qarsoodi kolka aad ku hadlayso telefanka ama qof kula jooga aad la hadlayso.

Xaquuqdaada aad u leedahay xog qarsoodiga sidoo kale waxaa ku jira kolka:

- aad kala hadlayso daryeelkaaga cid
- lagu baarayo ama lagu daryeelayo
- aad isticmaalayso musqusha ama wax kale oo nadaafadda qofka la xiriira.



Xaq-dhowrka dhaqankaagu waxa uu noqon karaa waxyaabaha sidda xaq-dhowrida iyo aqoonsiga afkaaga iyo caadooyinkaaga.

## Qoraaladdu waa Xog Qarsoodi ah

Qoraaladaada shakhsiyanka ah, kuwa dhaqaale, iyo kuwa caafimaadba waa khasab inay qarsoodi noqdaan. Haddii ciddi ay ku waydiisato iyaga, waa in laguu sheegaa cidda rabta iyo sababta ay u rabaan. Waxa aad ku oran kartaa maya qofka doonaya inuu arko haddii uusan sharcigu u ogolayn. Mar walba oo aad rabto waa aad arki kartaa qoraaladaadda.

**Qol iyo Dadka lala Dego**
Waxa aad u sharaxan kartaa qolkaaga sidii aad adigu rabto. Waxa aad isticmaali kartaa alaabta aqalka ee rabto. Haddii aad qol aad la wadaagayso cid, waxa aad dooran kartaa cidda qolka kula degaysa.

**Ashtakooyinka**
Waxa aad xaq u leedahay inaad ashtakooto ama aad wixii aad rabto aad waydiisato dadka. Goobtu aad ku jirtaa waa khasab inay kuu sheegto cidda uu yahay qofka shaqaalaha ka mid ah ee aad u ashtakoon karto. Waana inay degdeg kuugu jawaabaan.

**Kharashaadka iyo Dalacaada Lacagaha**
Ka hor inta aadan saxiixin wax ku shaqo leh deegaankaaga iyo adeegyadaada, waxa aad xaq u leedahay inaad ogaato dhamaan faahfaahinada ku saabsan kharashaadka iyo dalacaada lacagaha. Waa inay kuu sheegaan waxa aad mas'uulka ka tahay adigu inaad bixiso. Siddoo kale waa inay kuu sheegaan wixii xadidaadyo ah ee quseeya deegaanka guriga iyo adeegyada.




**Xaquuqaha Kale**
Xaquuqahaasi kuma jiraan liiska Xaquuqaha u gaarka ah Goobaha ka Gargaarida Nolosha, laakiin waxaad kaloo xaq u leedahay:

1. Inaad kaamara ku rakibato qolkaaga.
2. Racfaan ka qaadatid ka saarida Goob ka Gargaarida nolosha ah ee shati leh.
3. Inaad ka codsato caawimaad dhanka sharciga ah Wakiilka. Dadweynaha meelaha Daryeelka Mudadda Dheer ah bixiya. Haddii aad u baahan tahay caawimaada Wakiilka dadweynaha ka wac  khadka: 651-431-2555.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**